

# Marka kuugu horaysa ee aad gasho

Forældre (Waalidiinta)

War-  
bixin

Si aad u gasho Aula waxaad u baahan tahay, inaad isticmaasho UNI Login. Haddii aad u baahato inaad aragto qaybaha ka mid ah Aula, oo ay ku qoran tahay warbixinta qofka, waxaad u baahan tahay inaad ku gasho Nemid, ama waxaad ka geli kartaa moobaaylkaaga, ama baaswaard aad samaysatay, sawirka farahaaga, kuwaas oo aad ku gasho e-bookiska ama MobilePay-ga. Marka ugu horaysa ee aad galaysa Aula, waxaad u baahan tahay inaad isticmaasho Nemid-ga, ka dib waxaad helaysaa waxyaabo kale oo aad doordooran karto, Aula waxay ku jaan go'an tahay baahidaada iyo rabitaankaada.

1

Waxaad ka gali kartaa Aula halkan [ww.aula.dk](http://ww.aula.dk) ama waxaad kusoo dajisan kartaa moobaaylkaada ama tableetkaada, waxaad kasoo dajin kartaa App store-ka, ama Google Play.

Waxaad dooranaysaa habka aad rabto inaad u gasho sida "Forældre" (waalid).

2

Waxaad ku galaysaa UNI Login-kaaga. Waxaad galinaysaa magaca isticmaalka iyo baaswaardka.

3

Marka kuugu horaysa waxaad sidoo kale ku geli kartaa Nemid-ga. Mustaqbalka, haddaad rabto inaad dirto ama hesho fariin qaybta Aula ee warbixinta qofka, Aula wuxuu kaa dalbayaa inaad ku gasho Nemid-ga.

4

Ka hor inta aadan galin Aula, waa khasab inaad akhriso ood ogolaato qawaaniinta u yaala Aula.

Taabo  'Jeg har læst og accepteret betingelserne for brug af Aula' (Waan akhriyay oon aqbalay qawaaniinta u yaala isticmaalka Aula)

5

Ka dib waxaad cusboonaysiinaysaa warbixintaada la xiriirka  
Kadib waxaad taabanaysaa [Næste](#) (Xiga)

6

Hadda waxaa lagaa rabaa inaad go'aan ka gaadho waxyaabaha aad ogolaanayso. Waxyaabahan waxaa ka mid ah, sida haddii sawirada caruurtaada lagu soo bandhigi karo bayjka Aula. Haddii ilmahaagu uu ka yar yahay 16 sanno, waa inaad bixisaa ogolaanshaha ilmahaaga iyo taadaba Ogolaanshaha waxaad ku bixinaysaa inaad doorato 'Alle' (Kuli) 'Ja' (Haa) 'Nej' (Maya). Waa muhiim inaad ogaato, inaad ogolaanshaha u bixin karto habab kala duwan. Waxyaabha meediyaha, sida sawirada, waxaad dooran kartaa inaad dhahdo, ilmaha fasliisa ama sannadka uu yahay, ama kuluubyada iskuulka marka laga baxo, ama iskuulka ilmahaaga oo dhan Kadib waxaad taabanaysaa [Næste](#) (Xiga)

7

Talaabadan ugu danbaysa waxaad buuxinaysaa foom warbixineed Warbixinta foomkan waa warbixin guud iyo ogolaansho Warbixinta ku qoran foomka waa mid qofka uu leeyahay, markastana wax waa laga badeli karaa. Kadib waxaad taabanaysaa [Næste](#) (Xiga). Hadda waxaad gashay Aula

Hagid Talaabo-talaabo ah

Aula